

Caafimaadkaaga iyo Soo gelista Uumiga


GANACSIGA - OGEYSIINTA SHAQAALAHA

Goobtaada shaqadu waxay ku taal aag ay Hay'adda Xakamaynta Wasakhawga Minnesota (ama waax kale) ay ku samaynayso baaritaanka soo gelitaanka uumiga.

Waa maxay soo gelista Uumigu?

Kiimikada dhulka ku daatay ama lagu daadiyay ayaa waxay wasakhayn karaan ciidda iyo biyaha dhulka hoostiisa ku jira. Isku-dhafka Kiimikooyinka Dabiiciga ah ee Sida Fudud Hawada u Raaca (Volatile organic compounds (VOCs)) waa kiimikooyin si fudud hawada u raaca. Kiimikooyinka VOCs ee uumi ahaan uga soo baxa carrada wasakhaysan iyo biyaha dhulka hoostiisa ku jiraa waxay abuuri karaan uumiga kiimikada ee dhulka hoostiisa.

Haddii uumigani dhaqdhaqaaqo oo uu taabto dhismaha guriga, waxay ka soo gali karaan dildilaaca seeska, hareeraha tuubooyinka, ama iyaga oo soo maraya tuubooyinka bullaacadaha. Kiimikooyinka VOCs ayaa markaa wasakhayn kara hawada gudaha. Nidaamkan - marka wasakhdu ka soo baxdo meelaha hawadu ka jirto ee carrada dhexdeeda una gudubto hawada gudaha guriga - waxaa lagu magacaabaa soo gelitaanka uumiga.



Ma inaan ka walbahaaraa?



Haddii goobtaada shaqada ay saamayso soo galista uumigu, dadka ku jira dhismaha ayaa waxa laga yaabaa inay ku neefsadaan hawo wasakhaysan. Caadi ahaan, caddadka kiimikooyinka ee ka soo gala uumiga ka imanaya ciidda wasakhaysan ee dhismuhu ma aha walaac caafimaad oo dadka badankiisa ah waxyeelaya. Si kastaba ha noqotee, xitaa xaddi yar oo wasakhawga ah ayaa laga yaabaa inay walaac caafimaad u keenaan shakhsiyaadka u nugul, gaar ahaan **haweenka uurka leh ama laga yaabo inay uur yeeshaan**. Haddii aad tahay qof u nugul oo si joogto ah u deggan dhisme uu soo gelayo uumigu, fadlan la socodsii Waaxda Caafimaadka Minnesota.

Su'aalo? La soo xiriir Waaxda Caafimaadka ee Minnesota

Qaybta Qiimaynta iyo Latashiga goobta

Soo wac (651) 201-4897 ama Email u soo dir health.hazard@state.mn.us

[Soo gelitaanka Uumiga MDH](https://www.health.state.mn.us/communities/environment/hazardous/topics/vaporintrusion.html)

<https://www.health.state.mn.us/communities/environment/hazardous/topics/vaporintrusion.html>